



2018 Arts in Parks (AIP, Farshaxanka Darjiimada) Jaheynda Maalgelinta Barnaamijka

Office of Arts & Culture (Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka wuxuu) la kaashanaya Seattle Parks and Recreation (Darjiimada Seattle iyo Madadaalada) si loogu kordhiyo farshaxanka iyo dhacdooyinka bulshada ee darjiimada oo magaalada oo dhan ah. **Barnaamijka Arts in Parks** waa fursad magaalada ay maalgelineyo shaqada dhaqanka ee lagu sameeyay gudaha iyo bulshooyinka kala duwan oo dhinaca Seattle.

Warbixinta: ka lasoo xiriir Jenny Crooks, Maamulaha Mashruuca (206) 684-7084, jenny.crooks@seattle.gov

| | |
|--|---|
| Codsiga Waxaa laga heli karaa http://www.seattle.gov/arts/arts-in-parks | Dhammaadka waqtiga Tallaado, Oktoobar 24, 2017, 11 p.m. PST |
| Aqoon isweedaarsiyada: | |
| Tallaado, Sebteembar 5, 5:30-7:00pm Douglass Truth Library 2300 E Yesler Way, Seattle, WA 98122 RSVP Halkaan | |
| Qamiista, Sebteembar 28, 5:30-7:00pm Columbia Library 4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118 RSVP Halkaan | |
| Sabtida, Sebteembar 30, 11:00am-12:30pm Southwest Branch Library 9010 35th Ave SW, Seattle, WA 98126 RSVP Halkaan | |
| Sabtida, Oktoobar 7, 11:00am-12:30pm Northeast Branch Library 6801 35th Ave NE, Seattle, WA 98115 RSVP Halkaan | |
| U qalmida Farshaxanada shaqsiga ah, gollaha farshaxanka xaafadaha iyo kooxda bulshada deegaanka ku saleysan way u qalmaan. Hay'adaha iyo shaqsiyaadka farshaxanada matalayo bulshooyinka tabaalka ah oo ay ku jiraan daqliga hooseeyo, bulshooyinka socdaalka iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midibka waxaa lagu dhiirogelinaya inay codsadaan. Mashaariicda la soo jeediyay waa in la soo bandhigaa inta u dhaxeyso Abril 1 iyo Diseembar 15, 2018. | |

Maalgelinta

Codsadayaasha u qalma waxay codsan karaan illaa \$7,200 si loo taageero qarashaadka mashaariicda tooska ah.

Dulmarka Barnaamijka

Barnaamijkaan wuxuu taageeraa gollaha farshaxanka xaafada, kooxyada bulshada ku saleysan, iyo farshaxanka shaqsiga ah ee raadinayo inuu daaro Darjiimada Seattle ee u qalmo aagaga tabaaleysan iyo dhaqaala ahaan xakameysan ee caasimada oo ay la jirto feestoooyinka cusub iyo la aasaasay ama dhacdooyinka sare u qaado farshaxanka iyo ka qeybgalka dhaqanka. Dhacdada waa inay u dabaaldagtaa kala duwanaanshaha, iyo daartaa darjiimada dhinaca farshaxanka iyo dhaqanka iyaga oo ku xirmayo bulshooyinka dabaaleysan oo ay ku jiraan daqliga hooseeyo, socdaalka iyo bulshooyinka qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka.

U qalmida iyo Sharuudaha**Codsadaha** waa inuu:

- ahaadaa farshaxan shaqsi ah, gollaha farshaxanka xaafadaha ama kooxda bulshada deegaanka ku saleysan. Hay'adaha iyo shaqsiyaadka farshaxanada matalayo bulshooyinka tabaalka ah oo ay ku jiraan daqliga hooseeyo, kuwa curyaanka ah, bulshooyinka socdaalka iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midibka waxaa lagu dhiirogelinaya inay codsadaan.
- leeyahay lambarka Aqoonsiga Cabshuurta Faderaalka iyo ay ku saleysnaato caasimada Seattle. Kooxyada codsanayo looma baahno inay ahaadaan 501(c)(3) faa'ido la'aanta ama aan looga baahneyn inay isticmaalaan wakiilka maaliyada.

Mashruuca waa inuu:

- lahaadaa farshaxan iyo qeybaha dhaqanka ku filan,
- xor u ahaadaa bulshadana u furnaadaa,
- caymis lahaadaa,
- sii qaabka ee farshaxanada iyo bulshooyinka tabaaleysan,
- Adeeca bayaanka Howlgalka Park (fiiri hoos),
- iyo ka qaado meel caasimada darjiinka Seattle ee u dhaxeeyo Abriil iyo Disseembar 2018.
 - (*fiiri liiska ku lifaaqan ee darjiimada la doorbiday ee boggaga 5-6*).
 - Dhacdooyinka ka dhacayo Magaalada hoose ama Darjiimada Xarunta Caasimada ama Garoonka ciyarta iyo boosaska cagaarka ah isla markiiba sida ku dhow xarumaha bulshada **uma** qalanto maalgelintaan. Fadlan fiiri liiskaan ee darjiimada aan loo qalmin ee boggaga 6-7.

Bayaanka Howlgalka Darjiimada iyo Madadaalada Seattle: Darjiimada iyo Madadaalada Seattle waxay siisaa soo dhaweyn iyo fursado badbaado ah ee lagu ciyaro, lagu barto, ku fakaro, iyo dhiso bulsho, iyo sare u qaado masuuliyada wakiilnimada dhulka.

Waxaad gudbin kartaa kaliya hal codsi sannadkiiba barnaamijkaan. Kooxyada u qalmo waxay gudbin karaan codsiyada mashaariicda kala duwan ee labadaba AIP iyo [Neighborhood & Community Arts](#) (NCA, [Xaafada iyo Farshaxanka Bulshada](#)) hadiibo uu mashaariixda buuxiyaan jaheynada la xiriirto u qalmida. Haddii mashruuc

Kaliya u qalmo labadaba maalgelinta AIP iyo NCA codsiga waxaa lagu gudbin karaa labada barnaamij laakin waxaa kaliya oo ay ka helayaan maalgelinta hal (ma ahan labada barnaamij).

Maalgelinta

Hay'adaha la maalgeliyay waxay helayaan hal (1) sanno ee taageerada maalgelinta AIP (ee dhacdooyinka 2018) aado dhinacyada: qidmooyinka farshaxanka, qidmooyinka suuqgeynta iyo dalaciinta iyo qarashaadka gaarka ah, saadadka, qalabyada kirada ama qarashaadka alaabaha la xiriiro, shatiyada loo baahanyahay ([fiiri waraaqda shatiga](#)) iyo ma jiraan wax ka badan 10% oo qarashaadka cuntada la xiriirro. Codsadaha wuxuu u codsan karaa heerarka xiggo ee maalgelinta:

- \$1,200 (Uma baahno wax diiwaanada dabagalka ee walaabaha dhacdada.)
- \$2,400
- \$4,800
- \$7,200

Kaliya kooxyada leh taariiqda muuqato ee dhacdooyinka la soo saarayo ee loo codsan karo maalgelinta heerka \$2,400 iyo ka sareeyo.

Dhacdooyinka/mashaariicda horay loogu maalgeliyay heerka \$7,200 waxay kaliya oo ay quseyn kartaa kaliya \$4,800 ama ka hooseeyo, MARKII LAGA REEBO dhacdooyinka/mashaariicda bixiso ugu yaraan 12 saacadood ee barnaamijka bulshada ee darjiinka u qalmo.

Maalgelintaan ma maalgelineyso

- dadaalada maalgelinta;
- hadiyadaha;
- qarashaadka maamulka hay'adaha si toos ah ulama xiriirto mashruuca;
- iibsiga qalabka ama softaweerka;
- qarashaadka la xiriiro cuntada kore ee la ogolaan karo 10%.

Sharuudaha Qiimeynta

Hadafyada Barnaamijka Arts in Parks waa taageerida iyo kordhinta joogitaanka fanka darjiimada bulshada, si loo kordhiyo ka qeybgalka taariiq ahaanta bulshada tabaaleysan ee barnaamijka ku jirto, iyo taageerida iyo kordhinta tirada dhacdooyinka wanaagsan, qoyska saaxibka la ah ee dhista bulshada, u dabaal dag kala duwanaanshaha, oo sare u qaad farshaxanka iyo ka qeybgalka dhaqanka. Mashaariicda loo gudbiyay barnaamijka waxaa lagu qiiimeynaya sharuuda xigto:

- **Tayada Mashruuca:** Xiriirka cad, ee si wanaagsan loo aasaasay, dhab ah ee bulshada, sare u qaadaa ka qeybqaadashada farshaxanka iyo xiriirada bulshada.
- **Saameynta Bulshada:** Qorshaha mashruuca wuxuu sharaxaa dadaalo micno leh ee lagu aasaasayo ka qeybqaadashada bulshada iyo gaarista dhageystayaasha kala duwan iyo tabaaleysan. Hay'adaha iyo

- shaqsiyaadka farshaxanada matalayo bulshooyinka tabaalka ah oo ay ku jiraan daqliga hooseeyo, bulshooyinka socdaalka iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midibka waxaa lagu dhiirogelinayaan inay codsadaan.
- **Suurta galnimada:** Hay'ada/shaqsiga wuxuu leeyahay diiwaanka dabagalka la ansixiyay ee lagu bandhigayo midaan iyo/ama dhacdooyinka kale iyo/ama kartida la muujiyay ee lagu soo saarayo dhacdada (haddii la codsanayo \$2,400 ama ka badan); cadeynta bulshada ku lugleh iyo taageerada; iyo miisaaniyada dhabta cad ah ee dhacdada.
- **Darjiimada La doorbiday:** Mudnaanta waxaa la siinayaan mashaariicda ka dhacdo hal ama kuwa badan ee darjiimanka la doorbiday ee lagu aqoonsaday liiska boggaga 5-6, taas oo si gaar ah uga faa'ido isticmaalka lagu kordhiyay bulshada.

Jadwalka waqtiga

Guddiga farshaxanada faca madax banaan, bulshada, iyo wakiilada Seattle Parks and Recreation waxay eegayaan oo ay qiimeynayaan codsiyada sida waafaqsan sharuuda barnaamijka iyo maalgelinta lagu taliyay. **Ogeysiinta maalgelinta waxaa la sameynayaan dhammaadka Janaayo 2018.**

Buuxinta codsiga onleenka

- Ka aasaas ama cusbooneysii boggaaga <https://www.culturegrants-wa.org/>
- Ku buuxi codsiga onleenka adiga oo si buuxdo uga jawaabayo dhammaan su'aalaha hadalka.

Waajibaadyada helayaasha abaalmarinta

Haddii mashruucaaga loo doortay maalgelinta, waa inaad buuxisaa sharuudaha hoos ku qoran.

- Shatiyada caasimada iyo gobolka waxaa looga baahanyahay lacag bixinta (UMA baahnid shatiga gacansiga ee la codsanayo). Si aad u heshid lacag bixinta ugu dambeysa, shaqsiyaadka lagu abaalmariyay maalgelinta ee Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka waa inuu ku lahaadaa shatiga ganacsiga Seattle iyo Iambarka Washington State Unified Business Identification (UBI, Aqoonsiga Ganacsiga Mideysan Gobolka Washington). Wuxaan ku dari kartaa qarashka lagu helayo shatiyada ganacsigaaga ee miisaaniyadaada.
- Helayaasha maalgelinta wuxuu saxiixayaa heshiiska ka go'antayahay soo saarida mashruucooda iyo howlaha oo ay ku jiraan taraiiqaha loogu talo galay iyo goobta darjiinka ee bandhiga bulshada. Waxaa jirayo Kulanka Heshiiska oo iqtiyaar ah ee jaalalka mar dhow la maalgeliyay gudaha Febraayo 2018.
- Helayaasha abaalmarinta ayaa masuu ka noqonayo la shaqeeynta Seattle Parks and Recreation si loo buuxiyo oo loo gudbiyo waraaqaha shatiga la gudbiyay xiliga Maarsa 15, 2018.
- Helayaasha abaalmarinta ayaa masuul ka noqonayo illaalinta Caymiska Masuuliyada Dhacdada mashruucooda.
- Helayaasha abaalmarinta ayaa masuul ka ah bixinta dhammaan canshuuraha quseeyo. Xiliga heshiiska, waxaad u baahaneysaa inaad buuxisid waraaqaha shaqada ku haboon.
- Helayaasha abaalmarinta way ka go'antayahay aqoonsiga Office of Arts & Culture Seattle iyo Seattle Parks and Recreation ee siideynta warbaahinta, qoraalada la daabacay, warbaahinta bulshada, iyo saxiixa laga arki karo bulshada ama qaabab kale ee ku haboon mashruuca.

Talooyin

- Ka cusbooneysii ama buuxi diiwaankaaga aasaaska iyo bogga www.culturegrants-wa.org.
- Sahmi codsiga onleenka ee waqtiga hortiisa, gaar ahaan haddii aad tahay codsadaha waqtiga ugu dambeeyo.
- Tilmaamaha hore, hubi u qalmida iyo aqri sanduuqyada tilmaamaha.
- Ka qeybal aqoon isweedaarsiga/kulanka warbixinta.
- Bilow qorista ama ku tilmaamida hadalka codsigaaga xil hore. Wawaad raboon kartaa inaad ku qortid marka koowaad waraaq gooni ah si aad ugu aragtid sheekada oo dhan si cad.
- Hubi inaad keydisid oo aad dib u aqrисid shaqadadaada ka hor inta aadan gudbin.
- Ka soo wac maamulaha mashruuca su'aalaha xili hore ee waqtiga ka dhimman. Waan ku faraxsannahay inaan kugu caawiyo, laakin caawinta daqiqada ugu dambeysyo waxay ku xadidantahay waqtiga.
- Gudbi xili hore haddii aad u baahato waqtiga heshiiska lagu galayo qaladaadka codsiga.
- Labo jeer hubi miisaaniyadaada oo hubi in daqliga u dhigmo qarashaadka.
- Soo koob oo diyaari. Guddiga waa inuu aqriyaa oo qiimeeyaa darsimo codsiyada ah.

QOR DARJIIMADA AY DOORBIDAAN

Fadlan booqo Seattle Parks and Recreation [websaydka](#) iyo isticmaal Helaha Darjiinka si aad u eegtid warbixin badan ee ku saabsan darjiimo walba oo ku qoran.

BARTAMAHAA

- Denny Park
- Dr. Blanche Lavizzo Park
- First Hill Park
- Judkins Park
- Flo Ware Park
- Pratt Park
- Powell Barnett Park

WUQOOYIGA

- Albert Davis Park
- Ballard Commons Park
- Lake City Mini-Park
- Mineral Springs
- Salmon Bay
- University Playfield

BARIGA KOONFUR

- Hutchinson Park
- John C. Little Park
- Othello Park
- Pritchard Beach

GALBEEDKA KOONFUR

- Duwamish Waterway Park
- Highland Park Playground
- Myrtle Reservoir Park
- Roxhill Park

QOR DARJIIMADA AAN U QALMIN

Magaalada hoose ama darjiimada Bartamaha Caasimada UMA qalmaan Arts in Parks mashaariicda la maalgeliyay. Illaha maalgelinada kale waxaa loo heli karaa mashaariicda darjiimadaan.

2100 Westlake
Alaskan Way Blvd
Bell Street BLVD
Belltown P-Patch
Cascade Playground
City Hall Park
Denny Regrade OLA
Donnie Chin International Children's Park
Elliott Bay Bike Path
Freeway Park
Hing Hay Park
Kobe Terrace
McGraw Square
Myrtle Edwards
Occidental Square
Pier 62/63
Pioneer Square Park
Plymouth Pillars Park and Off Leash Area
Prefontaine Place
South Lake Union
Tilikum Place
Union Station Square
Victor Steinbrueck
Waterfront Park
Washington Street Boat Landing
Westlake Square
Westlake Park

2018 Barnaamijka Arts in Parks

Bogga jaheynada 7

Garoomaha iyo boosaska cagaarka isla markiiba udhow xarumaha bulshada UMA qalanto Arts in Parks mashaariicda la maalgeliyay. Xarumaha Bulshada waxay leedahay illaha maalgelinta ee loo heli karo mashaariicda darjiimadaan.

Alki Playground
Ballard Playground
Bitter Lake Playfield
Delridge Playfield
Garfield Playfield
Green Lake Playfield
Hiawatha Playfield
Laurelhurst Playfield
Loyal Heights Playfield
Magnolia Playfield
Meadowbrook Playfield
Miller Playfield
Montlake Playfield
Northgate Park
Rainier Beach Playfield
Rainier Playfield
Ravenna-Eckstein Park
South Park Playground
Van Asselt Playground
Walt Hundley Playfield
West Queen Anne Playfield
Yesler Playfield

Xeerarka Maalgelinta FANKA

Balanqaadka Sinnaanka Jinsiga

Seattle Office of Arts & Culture waxaa ka go'an dhaqanka shaqada cunsuriyada ka soo horjeedo ee dhexdhaxaadiso hal abuurka iyo hogaannimada dadka midibka - kuwa ay aadka u saameysay cunsuriyada qaabeysan - nidaamka horay u socdo ee aan dhammaanteen ka faa'idno. Wuxaan sidoo kale qirsannahay in aan nahay dhul asal ahaan, dhulka dhaqanka ee dadka Xeebta Salish.

Wuxaan qiyaasnay caasimada dadka ee guusheeda, badbaadadeeda iyo caafimaadka aan horay loogu go'aansan jinsigooda. Caasimada halka dhammaan farshaxanada, bandhigayaasha, qoraayaasha iyo shaqaalaha hal abuurka ay leeyihiiin xoriyada, hay'ada iyo xeerka lala wadaagayo iyo lagu xoojinayo sheekoooyinkooda, fanka, dhaqanka iyo waaya aragnimada. Isla waqtigaas, waan qorsannahay in tallaabooyinkeena - labadaba og iyo aan ogeyn, la soo dhaafay ama la joogo - way ka faa'ideen qaar ka mid ah bulshooyinka iyada oo la xadeynayo fursadaha bulshooyinka midibka. Wuxaan ka shaqeynayaa dhinaca hamiladeena iyada oo la sheegayo iyo laga shaqeynayo baabi'inta cunsuriyada qaabeysan ee barnaamijyadeena, xeerarka iyo dhaqamada.

Sida ay ku diyaarsantahay Barnaamijka Jinsiyada iyo Cadaalada Bulshada Caasimada, waxaan raadineynaa xalal cusub ee u isticmaalaa farshaxanada sida xeelada lagu kaxeynayo ma ahan kaliya xafiiskeena, laakin Caasimada sida guud ahaan dhinaca sinnaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada. Wuxaan joogteyneynaa inaan jabino xadeynada oo aan dhisno qalabyada farshaxanka la isku dhafo ee ka hortagaa arimaha jiray, oo noo riixo dhinaca bulsho lagu daray ee aan qiyasnay.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan balan qaadkeena, ama aad jeelaan laheyd inaad wax badan ka ogaatid shaqada aan sameyneyno, fadlan naga soo wac 206.684.7171 ama i-meel nooga soo dir Arts.Culture@Seattle.gov.

Qoraalada codsiga waa warbixin bulsho ah

Qoraalada codsiga ee loo gudbiyay Office of Arts & Culture wuxuu noqdaa warbixinta bulshada. Xubnaha bulshada waxay codsan karaan koobigooda ee ay la jirto codsi rasmi ah. Qoraalada waxay quseeyaan siideynta bulshada sabab la xiriirto Washington State Public Disclosure Act (Xeerka Siideynta Bulshada Gobolka Washington) (PDA:RCW 42.17). Si aad u codsatid koobiga xeerka, kala xiriir State of Washington Code Revisers' Office (Xafiiska Badelaha Xeerka Gobolka Washington) ee Olympia (360) 786-6777.

Takoorida laguma ogolo aagaha mashaariicda Caasimada maalgelisay

Codsadaha ka helayo maalgelinta Office of Arts & Culture waa inuu u hogangsamaa Xeerka Degmada Seattle Sadarka 20.44, ku saabsan ka hortaga takoorida heshiisyada Caasimada, iyo Sadarka 5.44, ku saabsan sharuudaha shatiga. Qoraalka buuxo ee xeerarka Caasimadaan waxaa laga heli karaa xafiiska Karaaniga Caasimada iyo Seattle Public Library.

Xeerka Mareykanka Curyaanka ah wuxuu quseeyaa mashaariicda Magaalada lagu maalgeliyay

Americans with Disabilities Act (ADA, Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah) waa sharciga faderaalka ee hubinayo gelitaanka adeegyada iyo xarumaha ee dadka curyaanka ah. Office of Arts & Culture waxay ixtiraamaan baahiyada dadka leh kartiyada kala duwan oo raadiyaa inay u diyaariyaan codsadaha, ka qeybqaataha iyo dhammaan dadka daneynayo warbixinta la xiriirto qodobada Americans with Disabilities Act iyo quseyntooda howlaha hay'adeena. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan kulamada bulshada, helitaanka iyo gargaarka maqalka, fadlan la xiriir Office of Arts & Culture ee (206) 684-7171 (codka), ama (800) 833-6388 (Xiriirinta TDD). Hay'adaan waxay u hogangsantahay dhammaan sharciyada faderaalka, gobolka iyo deegaanka ee ka hortagtaa takoorida shaqada iyo adeegyada.

Taageertaa xoriyada hadalka

Caasimada waxay aaminsantahay bulshada kobcisaa xoriyada hadalka iyo u maleeyo inay u hormareyso sida bulsho. Farshaxanka wuxuu ka ciyaaraa door muhiim ah oo lagu muujinayo caqabada walaacyada bulshada ee maalinta. Kartida Mareykanka sida qaran wuxuu ku haraa dulqaadkooda ee fikrada kala duwan iyo akraaha. Taageerada dowlada ee farshaxanka waa inuu sidoo kale ugu dulqaataa baaxada afkaaraha oo ku dhiirogeli xoriyada afkaaraha.